Australian Government

Department of Home Affairs

# Privacy notice

## Ogeysiinta arimaha gaarka ah

Form

1442i SOM

SOMALI

The Department of Home Affairs  (Wasaaradda Arimaha Gudaha) waxaa ku jira Xoogga Xadka Australiya. *Privacy Act 1988* (Privacy Act) (*Sharciga Arimaha gaarka ah 1988* (Sharciga Arimaha gaarka ah)) wuxuu u baahan yahay wasaaraddu wargeliyo qof shakhsi ah arimo qaarkood markii aan ururino macluumaad khaas ah oo ku saabsan iyaga. Foomkan waa aqoonsigaaga arimahaas.

## Waa maxay macluumaadka shakhsiyeed?

Sharciga Arimaha gaarka wuxuu bixinayaa macluumaadka shakhsiyeed waa macluumaad ama fikrad ku saabsan shakhsi si macquul ah loo garan karo.

Wasaaraddu waxay sidoo kale ururisaa macluumuuadka shakhsiyeed oo qaarkii xasaasi yahay, ee u qeexan sida waafaqsan Xeerka Arimaha Gaarka ah oo uu ku jiro macluumaadka ku saabsan qofka shakhsiga ah jinsigiisa, asalka jinsiyadiisa, nooca galmadiisa ama wuxuu qabto, diiwaanka dembiyadiisa, macluumaadka caafimaad iyo akhbaarta macluumaadkiisa, xubinnimadiisa xirfadeed ama jamciyaadka farsamo, diinta uu rumeysan yahay ama xiriirka la yeeyahay, falsafada uu rumeysan yahay iyo xubinnimada jamciyaadka siyaasadeed.

Qaybaha ugu muhiimsan ee sharciyada ay maamusho wasaaraddu waa *Migration Act 1958* (the Migration Act) (*Sharciga Socdaalka 1958* (sharciga Socdaalka)), *Customs Act 1901* (the Custom Act) (*Sharciga Kastamka 1901* (Xeerka kastamka), *Immigration (Guardianship of Children) Act 1946* (the IGOC Act), (*Socdaalka (Masuuliyada Carruurta) Act 1946* (Xeerka IGOC)), *Excise Act 1901* (Excise Act) (*Xeerka Cashuurta 1901* (Xeerka Cashuurta)), *Australian Border Force Act 2015* (the Border Force Act) (*Xeerka Xoogga Xudduuda Australia 2015* (Xeerka Ciidanka Xudduudaha)), *Maritime Powers Act 2013* (Maritime Powers Act) (*Xeerka Awoodaha Badda 2013* (Xeerka Awoodaha Badda)), iyo *Australian Citizenship Act 2007* (the Citizenship Act) (*Xeerka Muwaadinimada Australia ee 2007 (*Xeerka Muwaadanimada)).

## Muujiyayaasha shakhsiyeed

Xeerarka Muwaadinka iyo Socdaalka waxaa ka mid ah warbixin khaas ah oo ku saabsan ururinta, isticmaalka, iyo/ama bixinta macluumaadkaaga shakhsiga ah, oo uu ku jiro macluumaadka xasaasiga ah sida waxa lagugu garanayo (oo sidoo kale loo yaqaan 'muujiyayaasha shakhsiyeed').

Sharciyadu waxay qeexayaan waxyaalaha shakhsiga lagu garanayo si loogu daro:

- sawirka faraha ama gacmaha
- muuqaalka wejiga iyo garbaha
- dhageysi ama duubista fiidyowga (oo ujeedadoodu tahay Sharciga Socdaalka oo kaliya iyo waxoogaa xaddidan oo laga soo reebayo)
- cabiraada dhererka iyo culeyska
- sawirka wilka isha
- qofka saxiixiisa, ama
- wax kasta oo kale oo qofka lagu qaranayo oo lagu sharxay sharciga.

Macluumaadka lagugu garanayo (muujiyayaasha shakhsiyeed) waxaa laga yaabaa in la ururiyo iyo/ama laga xaqiijiyo shakhsiyaadka:

- garoonka diyaaradaha markaad safreysid
- codsadayaasha fiisaha ee dalka jooga (oo ay ku jiraan codsadayaasha fiisaha ilaalinta)
- ee ah muwaadiniin aan Australiyaan ahayn oo ku nool jaalliyada Australiya dhexdeeda
- oo ah maxaabiista laanta socdaalka
- oo ah codsadayaasha dhalashada Australiya.

## Waxay wasaaraddu sameyso iyo faahfaahinteena xiriirka

Waajibaadka wasaaraddu waa in ay ilaaliso xadka Australia oo ay maamusho dhaqdhaqaaqa dadka iyo alaabta maraya iyadoo wax ka geysanaysa oo hubineysa:

- mustaqbalka Australiya ee maareynta socdaalka
- ilaalinta qaxootiga iyo wax ka geysiga qorshaha bani'aadamnimo ee caalamiga ah
- nabad sugida Australia ee maareynta xaduudda iyo fududeynta safraha
- ururinta dakhliga xuduudda iyo tirakoobka ganacsiga
- fududeynta ganacsiga sharciga ah
- nabad sugida xeebaha Australia iyo dannaha ganacsiyeed
- raacidda shuruucda laanta socdaalka Australia caddaalada go'aan qaadashada
- maamulida shuruucda muwaadiniinta Australia .

Waxaa laga heli karaa faahfaahinta xiriirka oo buuxda website ka wasaaradda ee ah **www.homeaffairs.gov.au**

Haddii aad rumeysan tahay inaan si khaldan u ururinay ama u maamulney macluumaadkaaga, waxaad awoodaa:

- Ku buuxi foomka natiijo celinta interneetka ee **www.homeaffairs.gov.au/feedback**
- warqad u soo qor:
  The Manager
  Global Feedback Unit
  GPO Box 241
  Melbourne  VIC  3001
  Australia

## Wasaaraddu yey ka ururineysaa macluumaadkaaga shakhsiyeed

Guud ahaan, wasaaradda (ama adeeg bixiyayaasha qandaraasleyda ah) inay si toos ah macluumaadka shakhsiyeed adiga kaaga ururin doonaan, dhinaca saddexaad ee aad u idintay inuu ku metelo ama nidaamka idman sida ku qeexan ee waafaqsan Xeerka Socdaalka. Nidaamyada idman waxaa ka mid ah SmartGate iyo nidaamyada kale caddeynta xadka ee otumaatiga ah. Waxaan sidoo kale ka ururin karnaa macluumaadka dhinacyo saddexaad oo laga yaabo inay ka mid ah ha'yadaha kale ee Dawlada Australiya, ha'yadaha dhaqangelinta sharciga, dawladaha dibeda, kafaalayaasha, dhakhaatiirta caafimaadka, ururada aad magacowdeen, waxbarasho bixiyayaasha, loo shaqeeyayaasha iyo xubnaha dadweynaha oo kula xiriira wasaaradda macluumaad (tusaale 'wicitaanada soo sheeg').

© COMMONWEALTH OF AUSTRALIA, 2020

### Wakaalada ama adeegyada socdaalka waxqabadka qandaraaslayaasha

Waxoogaa ah macluumaadka shakhsiyeed waxaa laga ururiyey oo loo isticmaalay iyadoo nala metelayo ha'yadaha kale ee dawlada oo loo idmay inay qabtaan qaar ka mid ah shaqooyinka wasaarada.

Macluumaadka shakhsiyeed waxaa sidoo kale ururiyey oo isticmaalay iyagoo na metelaya qandaraaslayaasha. Tusaalayaasha waxaa ka mid ah maamulida rakaabka ee horumarsan ee diyaaradaha, ee labadaba duulimaadyada baxaya iyo kuwa soo gelayaba, nidaamka kumbiyuutarada, xograadinta cilmi barista/wareysiyada, adeegyada taageerada ee loogu talagalay maxbuusyada laanta socdaalka iyo adeegyada caafimaadka.

Wasaaraddu waxay u baahan tahay in qandaraaslayaasheedu sidoo kale ay raacaan Xeerarka Arimaha Gaarka ah , iyadoon loo eegaynin inay ku yaaliin Australia ama dibedda.

## Ururinta macluumaadkaaga shakhsiyeed ee uu u baahan yahay ama idmay sharcigu

Sharciga Socdaalka, Sharciga IGOC, Sharciga Kastanka, Sharciga Cashuurta dheeraadka ah, Sharciga Awoodaha Badda, Sharciga Muwaadiniinta iyo Sharciga Arimaha gaarka ah wuxuu idmayaa, iyo xaaladaha qaarkood oo u baahan, wasaaradu inay ururiso wax ka mid ah macluumaadka shakhiyeed si loogu maamulo Sharciyadan.

### Sharciga Socdaalka

Waxyaalaha la xiriira codsiyada Visaha, wasaaraddu:

- waxay u idman tahay inay ururiso macluumaad kasta oo khuseeya codsiga (eeg qaybta 56 ee Sharciga Socdaalka), iyo
- waxaa laga yaabaa inay u baahato inay bixiso lagu gartaha shakhsiyeed (eeg qaybaha 40 iyo 46 ee Sharciga Socdaalka).

Codsadayaasha Visaha, iyo qaarka heysta visaha, waa inay soo wargeliyaan wasaaradda wixii isbedel ah ee xaaladaha ama macluumaad khaldan oo lagu qoray foomka codsiga ah (qaybaha 104 iyo 105 ee Sharciga Socdaalka).

Waxaa laga yaabaa inay wasaaraddu u baahato inaad keento mid ama wax ka badan oo ah waxyaalaha.

Markaad soo gelaysid Australiya, wasaaraddu waxay kaaga baahan doontaa inaad siiso macluumaadka shakhsiyeed qaarkiis (tusaale Baasaboorka muwaadiniinta, caddeynta aqoonsiga iyo Fiisaha kuwaan muwaadiniinta ahayn). Haddii aadan muwaadin ahayn oo aan caddeynta loo baahan yahay la bixin, waxaa laguu diidi doonaa soo gelitaanka Australiya (arag qaybta Xeerka Socdaalka ee 257A).

Markaad ka baxeysid Australiya, wasaaradda waxaa laga yaabaa inay kaaga baahato inaad siiso qaar ka mid ah shakhsiga waxa lagu qarto (eeg qaybta 275A ee Sharciga Socdaalka).

Si loo garto qof aan muwaadin ahayn oo sharci darro ah, waxaa laga yaabaa wasaaraddu inay u baahato:

- caddeynta aqoonsiga iyo visaha, oo ay ku jiraan qofka waxa lagu garanayo (eeg qaybaha 188 ee Sharciga Socdaalka)
- qofku inuu dhiibo dukumiintiga ama macluumaad ku saabsan aqoonsiga ama meesha uu joogo qofka laga shakisan yahay inuu yahay qof aan muwaadin ahayn oo sharci darro ah (eeg qaybta 18 ee Sharciga Socdaalka).

Qofka ku jira xabsiga laanta socdaalka waa inuu bixiyaa waxyaalaha shakhsiga lagu aqoonsanayo (eeg qaybaha 258 iyo 261AA(1) ee Xeerka Socdaalka iyo sharciga 3.30 ee Shuruucda Socdaalka).

Marka loo eego kafaalayaasha ganacsiga, wasaaradda waxaa laga yaabaa inay ururiso macluumaadka shakhsiyeed iyadoo loo eegayo awoodaha kormeeraha ee qayb hoosaadke F ee Qaybta 3A ee qaybta 2 ee Sharciga Socdaalka.

U jeedooyinka awooda baaritaanka ee qaybta 252 ee Sharciga Socdaalka, sarkaal idman ayaa laga yaabaa inuu heysto dukumiintiga ama waxa kale ee laga hellay qof ama alaab uu qofku kontoroolo, tusaale, waxaa laga yaabaa in taasi noqoto caddeynta lagu joojinayo fisaha qofka.

Sarkaal ayaa laga yaabaa inuu la wareego dukumiintiga beenta ah ee aad lacagta ka bixisay (eeg qaybta 487ZJ, iyo Waaxda 1 ee Qaybta 9 ee Sharciga Socdaalka oo ay ku jirto iyo sida dukumiintiga loola dhaqmayo).

### Sharciga Muwaadininimada

Wasaaradda waxaa laga yaabaa inay ururiso macluumaad shakhsiyeed oo kala duwan si loogu qanco in qofkaasi fuliyo shuruudaha muwaadininimada.

Waxaan u idmanahay inaad codsano waxyaalaha lagu qarto shakhsiga ee la xiriira codsiyada muwaadininimada, iyo codsigana lama ogolaan karo haddii go'aan ka gaaruhu uusan ku gancin aqoonsigaaga (eeg Qaybta 5 ee Qaybta 2 iyo qaybaha 17(3), 19D(4), 24(3), iyo 30(3) ee Sharciyada Muwaadininimada.

Wakiilka waxaa laga yaabaa inuu qabto dukumiintigaas been abuurka ah ee aad lacagta ka bixisay (eeg qaybta 45B, iyo Qaybta 1 ee qaybta 3 ee Sharciga Dhalashada oo ay ku jirto sida dukumiintiga loola dhaqmayo).

### Xeerka IGOC

Sida waafaqsan *Immigration (Guardianship of Children) Act 1946* (the IGOC Act) (*Laanta Socdaalka Xeerka 1946 (Masuuliyada Carruurta)* (Xeerka IGOC)) iyo shuruucdiisa, Wasiirka Laanta Socdaalka waa masuulka carruurta yar yar ee aan ciddi la socon Australiyaankana ahayn ee yimaada Australiya iyadoo uusan la socon waalid ama qaraabo 21 sanno jir ah ama wax ka weyn (oo loo yaqaan carruurta yar yare e IGOC).

Si ay u caawiso fulinta waajibaadka masuuliyada, Xeerka IGOC wuxuu u ogolaanayaa Wasiirka inuu u gudbiyo awoodihiisa/heeda masuuliyadeed iyo shaqooyinka saraakiisha Dawlada Dhexe ama gobolka ama dawladaha territory-ga (oo la yiraahdo 'masuuliyada la sii gudbiyey'). Shakhsiyaadka ku haboon ama ururada ayaa sidoo kale loo magacaabi karaa inay noqdaan 'masuuliyiinta carruurta yar yare e IGOC. Guud ahaan shuruudaha, masuulku uu xaqa u leeyahay iyo waajibaadka si uu uga gaaro go'aamo ku saabsan xannaano maalmeedka iyo kontoroolka ilmaha masuuliyadooda ku jira.

Si loo hubiyo xannaano maalmeedka iyo samafalka carruurta hoos timaada Xeerka IGOC, wasaaraddu waxay ururisaa macluumaad shakhsiyeed oo ku saabsan carruurta IGOC iyo masuuladooda. Si loo hubiyo xannaano maalmeedku iyo samafalka uu u baahan yahay carruurta IGOC in la fuliyey, meeshii lagama maarmaan ah iyo sida waafaqsan Xeerka Arimaha Gaarka ah, wasaaraddu waxaa laga yaabaa inay siiso macluumaadka shakhsiyeed iyo inay ka soo ururiso macluumaadka:

- Dawlada gobolka/territory ga, oo ay ku jirto hay'adaha samafalka carruurta
- Masuuliyiinta xilka loo dhiibay
- Masuuliyiinta
- waalidiinta, xannaaneeyaha iyo/ama qaraabada iyo/ama
- Hay'adaha kale Dawlada Australiya.

### Xeerka Cashuurta iyo Xeerka Kastanka

Wasaaraddu waxay u idman tahay inay ururiso ilaa in ah macluumaadka ganacsiga iyo ka shakhsiyadeed ee maamulka Kastanka iyo Xeeraraka Cashuurta iyo shuruucda kale ee Australia ee la xiriira (oo ay ku jiraan Xeerka Socdaalka iyo sharciga cashuuruhu). Gaar ahaan, wasaaraddu waxay ururisaa macluumaadkan si ay u ilaaliso xudduuda Australia iyo hubinta dakhliga xadduuda.

Xaaladaha qaarkood, foomamkeena kaa ururiya macluumaadka shakhsiyadeed adiga arimaha ka dhasha sida waafaqsan Xeerarka Cashuurta iyo Kastanka iyo sharciga cashuuraha ayaa waxaa laga yaabaa inay sidoo kale leeyihiin ogeysiisyo ururineed oo khaas ah. Foomamkaan waxay sidoo kale ku siinayaan macluumaad khaas ah oo ku saabsan ururinta, isticmaalka iyo bixinta macluumaad ka shakhsiyadeed ee lagu soo uruririyey dukumiintigaas, waana in lala akhriyaa ogeysiiskaan gaarka ah.


© COMMONWEALTH OF AUSTRALIA, 2020

Tusaale ahaan, sida waafaqsan 64ACA iyo 64ACB ee xeerka Kastanka, wasaaradda waxaa la doonayaa inay ka soo ururiso macluumaadka shakhsiyeed qaarkiis ku saabsan rakaabka iyo shaqaalaha maraakiibta iyo diyaaradaha imanaya Australia, ujeedaduna tahay maamulida Xeerka Kastanka, Xeerka Socdaalka iyo shuruucda kale.

### Xeerka Awoodaha Badda

Wasaaraddu waxay u idman tahay inay soo ururiso macluumaadka shakhsiyadeed iyadoo fulinaysa awoodaha badda hay'adaha dhaqangelinta biyaha. Awooduhu waxay taageeraan dhaqan gelinta shuruucda la xiriira badda ee austral, oo ay ka mid yihiin waxa la xiriira kaluumeysiga sharci darada ah, kastanka, ka hortaga argagaxisada badda, socdaalka, karantiinka iyo ka ganacsiga daroogada, iyo sidoo kale heshiisyada caalamiga ah iyo qorshaha badda.

### Sharciga Arimaha gaarka ah

Sharciga Arimaha gaarka ah wuxuu u ogolaanayaa in laga ururiyo:

- macluumaadka xasaasiga ah meeshii lagu idman si waafaqsan sharciga, ama shaqooyin la xiriira dhaqangelinta , ama ka raali ahaanshahaaga
- macluumaadka kale ee shakhsiyeed meeshii uu si macquul ah lagama maarmaan ah ee, ama si toos ah ula xiriira, mid ama wax badan oo ka mid ah waxqabadka ama shaqooyinka wasaaradda.

### Xeerarka wasaaraddu ay ka tahay hay'ada sharci fulinta

Wasaaraddu waa wakaalada dhaqangelinta sharciga ee ujeedooyinka qaarkood sida waafaqsan Xeerarka soo socda: the C*rimes Act 1914,* the *Criminal Code Act 1995,* the *Australian Nuclear Science and Technology Organisation Act 1987* (the ANSTO Act) and the *Independent National Security Legislation Monitor Act 2010 (Xeerka Dembiyada 1914, Xeerka Koodhka dembiyada 1995, Xeerka Ururka tignoolajiyada iyo Sayniska Nugliyeerka Australiya 1987* (Xeerka ANSTO) iyo *Xeerka La socodka Sharciga nabedgelyada Qaranka ee madaxa bannaan 2010),* waxaana laga yaabaa in la ururiyo macluumaad shakhsiyadeed si ay u qabtaan shaqooyinkooda iyo waxqabadka hoos imanaya Xeerarkaas.

## Ujeedada aanu u ururino macluumaadka shakhsiyeed

Ujeedadeena ugu muhiimsan ee lagu ururiyo macluumaadka shakhsiyeed waa in la qabto shaqooyinka ama waxqabadka wasaaradda ee la xiriira laanta socdaalka iyo/ama dariiqa muwaadanimada, iyo dhaqdhaqaaqa alaabta ee xadka, Waxaan maamulnaa barnaamijyada soo socda:

- visaha iyo socdaalka
- cashuurta iyo kastamka, oo ay ku jiraan maamulka shuruucda Australia qaarkood oo ay ka mid yihiin cashuuraha, caafimaadka, karantiinka, ganacsiga, dembiyada, hantida aan la taaban karin ee aad sameysay iyo shuruucda ilaalinta bulshada
- qaxootiga iyo caawimaada bani'aadaninimo
- maamulka xadka
- raacida visaha iyo xalka xaalada socdaalka
- xabsiga socdaalka, ka saarida ama u wareejinta Xarunta Maamulida Gobolada (oo ay ku jiraan adeeg bixiyayaasha iyo hay'ada dibeda iyadoo la taageerayo shaqo dib ku qabashada, sida dhaqangelinta sharciga, bixinta adeegyada samafalka iyo dejinta)
- muwaadaninimada.

Macluumaadka aad ku bixiso visaha, wakaalashado ganacsiga, wax soo dejinta iyo dhoofinta, karantiinka, ama codsiga muwaadaninimada ayaa loo isticmaali doonaa ujeedadaas ugu muhiimsan.

Waxa waafaqsan Sharciga Arimaha gaarka ah, macluumaadka waxaa sidoo kale loo isticmaali karaa ujeedada labaad, guud ahaan tani waa meeshaad macquul ahaan uga rajeyn karto wasaaradda inay isticmaasho ama bixiso macluumaadkaaga shakhsiyeed iyo ujeedada labaad inay si toos ah ula xiriirto ujeedada ugu muhiimsan (macluumaadka ugu xasaasisan) ama la xiriira ujeedada ugu muhiimsan (ee macluumaadka kale ee shakhsiyeed), tusaale, macluumaadka aad u bixiso codsiga visaha waxaa laga yaabaa in loo isticmaalo waxa la xiriira codsiyadaada isla xiriira (oo ay ka mid yihiin sida waafaqsan Sharcigada Arimaha gaarka iyo *Freedom of Information Act 1982 (Macluumaadka Sida Xorta ah leehayo ee 1982)*, waxaa sii dheer, waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno faahfaahinta xiriirka ee elektarooniga ah ee aad bixisay si lagaala soo xiriira waxa ku saabsan arimaha socdaalka.

## Cawaaqibyada haddii macluumaadka shakhsiyeed aysan ururin wasaaradu

Haddii macluumaadkaaga shakhsiyeed aan la ururin, wasaaradda waxaa laga yaabaa inaysan awoodin inay ka shaqeyso codsigaaga visaha ama muwaadaninimada ama (meeshii ay khuseyso) inay ku siiso ganacsi, wax dhoofin , soo dejin iyo adeegyada taageerada karantiinka adiga.

Haddii lagu guuldareysto in la ururiyo macluumaadkaaga waxaa laga yaabaa inuu hor istaago awoodii ay wasaaraddu ay fulin lahayd waajibaadkeeda sharciga ah (gaar ahaan sida la xiriirta waxyaalaha ay raacsan tahay), waa waajibaadka daryeel ee ka saaran, ama balanqaadyada caalamiga ah ee Australiya.

## Bixinta caadiga ah ee macluumaadka shakhsiyeed ee dhinac saddexaad

### Bixinta wakiilo la magacaabay

Meeshaad qof magacowday, sida xubin qoyska ah, wakiilka socdaalka, mukhalaska kastamka wakiilka dayaarada ama safarka, Ombudsman, Xubin Baarlamaanka ah, ama sharci yaqaan ku matelaya, macluumaadkaaga shakhsiyeed waxaa laga yaabaa in siiyo dhinacyo kale inaad naga codsato inaanan sidaa yeelin mooyee.

Macluumaadkaaga shakhsiyeed waxaa la siin karaa qofkaad kafaalaneyso ama qofka ku kafaashey.

### Siinta caadiga ah ee ha'yadaha kale ee dawlada

Waxaa intaas sii weheliya, Wasaaraddu waxay, xaaladaha qaarkood, ku idman tahay ama loo ogol yahay sida waafaqsan Xeerka Xoogga Xudduudaha ama shuruucaha kale inay siiso macluumaadka shakhsiyeed ha'yadaha kale ee dawlada sida oo ujeedadu tahay maamulida shaqooyinkooda iyo nashaadkaba ama awood in loo siiyo ama la caawiyo hay'adaha kale inay qabtaan shaqooyinkooda. Tusaalayaasha waxaa ka mid ah daah ka qaadida in ta'kiidiyo aqoonsigaaga, hubinta dukumintiga asalka ah oo aad bixisay, qaadista is waafajinta xogaha, ama maaraynta raacista waajibaadka.

Ha'yadaha dawlada Waxaan isdhaafsanaa macluumaad ay ku jiraan aanse ku xaddidneyn:

- Wasaaradda Adeegyada Bani'aadamka, si loo maamulo *Social Security Act 1991 (Sharciga Dammaanada Bulshada 1991) Child Support (Assessment) Act 1989 (Taageerada Ilmaha (Qiimeyn) Xeerka 1989))* iyo *Child Support (Registration and Collection) Act 1988 (Taageerada Ilmaha Xeerka (Ururinta iyo Diiwaangelinta) ee 1988)*
- Wasaaradda adeegyada Bulshada
- Wasaaradda Beeraha inay maareeyso nidaamka nabadgelyada bayoliga iyo maamulka *Quarantine Act 1908 (Xeerka Karantiinka 1908)*, *Export Control Act 1982 (Xeerka Kontoroolka Dhoofinta 1982)* iyo *Imported Food Control Act 1992 (Xeerka Kontoroolka Cuntada lasoo dhoofiyey 1992)*
- Maamulka badeecada laysku daaweeyo
- Wasaaradda Wershadaha, Seyniska iyo Hindisaada
- Australian Sports Anti-Doping Authority (Hay'ada Ka hortaga Khiyaanada Cayaaraha ee Australia) si loo maamuloe National Anti-Doping Scheme (Qorshaha Ka hortaga Khiyaanada Qaranka)

© COMMONWEALTH OF AUSTRALIA, 2020

- Wasaaradda Waxbarashada, si ay u maamusho *Education Services for Overseas Students Act 2000 (Adeegyada waxbarashada ee Sharciga Ardeyda Dibeda 2000)*
- Wasaaradda Shaqada, Mihnadaha Ganacsiyada Yar Yar iyo kuwa Qoyska
- Wasaaradda Arimaha Askarta dalka u soo dagaalantay, in la maamulo *Veterans' Entitlements Act 1986 (Sharciga Xuquuqda Askarta dalka u soo dagaalamay 1986)*
- Xafiiska Cashuurta Australiya (ATO), si loo maamulo *Income Tax Assessment Act 1997 (Sharciga Qiimeynta Dakhliga Cashuurta 1997)* iyo shuruucda kale ee cashuurta
- Ombudsman ka Caddaalada Shaqada (FWO), si loo maamulo *Fair Work Act 2009 (Xeerka Caddaalada Shaqada 2009)*
- Wasaaradda Arimaha Dibeda iyo Ganacsiga (DFAT) si loo maamulo *Australian Passport Act 2005 (Sharciga Baasaboorka Australiya 2005)* iyo in la helo macluumaadka dalka si looga shaqeeyo visa nabadgelyada iyo wixii ah baasaboor dibadeed ee aad xaq u leedahay inaad haysato sidii qof laba dhalasho leh
- Guddiga Doorashooyinka Australiya, si loo maamulo *Commonwealth Electoral Act 1918 (Sharciga Doorashooyinka Dawlada dhexe 1918)*.

### Dib u eegid, Hantidhowrid iyo Ha'yadaha Baaritaanka

Haddii aad dalbato xaqiiqda ama dib u eegida go'aanka maxkamadaha, wasaaraddu waxay ku siin doontaa macluumaad shakhsiyeed oo khuseeya maxkamada sharciga ama maxkamada dib u eegista sameynaysa.

Waxaan la wadaagnaa macluumaadka ha'yadaha baaritaanka sida:

- Ombudsman ka Dawlada dhexe
- Guddoomiyaha Macluumaadka ee Xafiiska Australiya
- Hantidhowrka Qaranka Australiya
- Guddiga Xuquuqda Bani'aadamka Australiya
- Ombudsman ka Shaqada Cadaalada ah.

### Xaaladaha degdega ah iyo dhaqangelinta sharciga

Macluumaadka shakhsiyadeed waxaa laga yaabaa in la siiyo ha'yadaha dhaqangelinta sharciga ee Australiya ama adeegyada xaalada degdega ah lacala haddii ay timaado xaalad degdeg ah, dhaawac xooggan ama dhimasho.

Wasaaraddu waxay sidoo kale siisaa macluumaadka (Dawlada dhexe, gobolka iyo territory ga) Australia iyo wakaaladaha dhaqangelinta dibeda ama hay'adaha meeshay lagama maarmaan u tahay dhaqangelinta waxqabad, oo ay ka mid tahay ka hortaga, ogaanshaha, baaritaanka iyo dacweynta ama ciqaabta fal dembiyeedka.

## Barnaamijyada taageerada

Macluumaadka lagu soo ururiyey ka shaqeynta visaha waxaa laga yaabaa la siiyo:

- Wasaaradda Adeegyada Bulshada si ay u bixiso taageerada degitaanka
- Wasaaradda Wershadaha, Seyniska iyo Hindisaada si loo fududeeyo oo loola socdo tababarka luuqada Ingiriiska.

## War siinta ha'yadaha laysan bixinta

Haddii aad laysan ka dalbaneyso Australiya gudaheeda, wasaarada waxaa laga yaabaa inay siiso ha'yada ay khuseyso macluumaad ku saabsan xaalada socdaal iyo xuquuqda shaqo, iyo xaaladaha qaarkood haddii laguu ogolaaday muwaadaninimada Australiya iyo in kale. Macluumaadkan waxaa loo isticmaali doonaa in lagu qiimeeyo ku haboonaanta inaad laysan heysato. Waxaa sidoo kale jira war bixin khaas ah oo laga yaabo in la sameeyo haddii aad dalbato laysan khaas ah sida waafaqsan Xeerka Kastamka.

## Bixinta idman ee macluumaadka shakhsiyeed

'Waxa qofka lagu garanayo' waxaa lagu qeexay Bogga 1.

Wasaaradda waxay leedahay awood waafaqsan Qaybta 4A ee Sharciga Socdaalka iyo s43 ee Sharciga Muwaadaninimada si loo bixiyo waxyaalaha lagu garanayo shakhsiga xaalado fara badan. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah:

- in la xaqiijiyo xaalada visaha ama muwaadanimada
- dhaqangelinta sharciga dembiyada
- isdhaafsiga macluumaadka wax lagu aqoonsanayo oo waafaqsan nidaamka ay ku heshiisay ha'yada Dawlada Australia
- u diyaarinta macluumaadka khuseeya maxkamada, maxkamada sharciga ama ha'yada baaritaanka
- meeshii uu uga baahdo sharciga Australiya.

Wasaaradda sidoo kale waxay awood u leedahay waafaqsan Sharciga Muwaadaninimada bixinta macluumaadka lagu garanayo shakhsiga oo ujeedadiisu tahay sharciga socdaalka ama muwaadaninimada.

Qaybta 4A ee Sharciga Socdaalka sidoo kale wuxuu idmanayaa in wasaaradda ay ku bixiso macluumaadka shakhsiyeed (oo ay ka mid yihiin waxa shakhsiga lagu garanayo) xaaladaha soo socda:

- iswaafajinta macluumaadka:
  - si loo garto, ama loo xaqiiqsado aqoonsiga qofka
  - si loo fududeeyo ka shaqeynta dadka soo gelaya ama kuwa ka baxaya Australiya
  - si loo garto dadka aan muwaadaniinta ahayn eel eh taariikh dembi, dhaqankooda la saluugsan yahay ama nabadgelyada qaranka looga saluugsan yahay
  - si loola dagaalamo iyo in la garto khiyaanada arimaha socdaalka
  - si loo caawiyo ka shaqeynta visaha nabadgelyada
- si loo garto ama loo ogaado meeshuu joogo qofi (arag sidoo kale qaybaha 33FA iyo 33FC ee Sharciga Socdaalka)
- si loo siiyo ha'yada baaritaanka ee la sheegay sida Xafiiska Hantidhowrka Qaranka Australiya iyo Guddiga Xuquuqda Bani'aadamka Australiya
- si loola sameysto heshiis dawladaha dibeda si qof looga saaro Australiya ama ujeedooyinka ka celinta qof ama ku soo celinta Australiya
- si looga dhigo macluumaadka mid ay heli karaan dawladaha dibeda ee sheegay, dhagangelinta sharciga ama ha'yadaha kontoroolka xadka ee dawladaha dibeda, ama ururo caalami ah oo la sheegay oo ujeedooyinkoodu yahay maareynta arimaha la xiriira socdaalka (eeg qaybta 5A(3) ee Sharciga Socdaalka)
- si loo helo ama loo siiyo caawimaad arimaha debiyada caalamiga ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan waxa qofka lagu garanayo ka eeg foomka 1243i.

Wixii la xiriira visaha shaqaalaha, wasaaradu waxay sidoo kale u idman tahay inay bixiso macluumaadka shakhsiyeed qaarkii oo ku saabsan qofka kaafaalanaya ama dadka visaha heysta qofka qaabilsan ee visaha heysta ama qofka wakaashey (eeg qaybta 140ZH ee Sharciga Socdaalka iyo shuruucda 2.103, 2.104 iyo 2.105).

Wasaaraddu waxay sidoo kale u idman tahay inay bixiso macluumaadka shakhsiyeed oo ah Macluumaadka Ilaalinta Xadka iyo Socdaalka ( eeg qaybta 4 (1)  ee Xeerka Ciidamada Xadka) Xaaladaha xaddidan ee lagu sharxay Qaybta  6 ee Xeerka Ciidamada Xudduudaha.  Xaaladaha qaarkood Xeerka Ciidanka Xudduudaha wuxuu u ogolaanayaa in la siiyo macluumaad hay'dahan soo socda:

- Wakaaladaha dawlada dhexe, gobolka iyo terrirtory ga ama hay'adaha
- Booliiska Dawlada dhexe ee Australia (AFP) ama ciidamada boliiska ama adeega gobolka ama territory ga
- Sarkaalka baaritaanka


© COMMONWEALTH OF AUSTRALIA, 2020

- Xafiis hayayaasha sharciyeysan ee dawlada dhexe, gobolka ama territory ga (tusaale Ombudsman)
- Hay'ado ama dad uu sheegay Xoogga Xudduudaha Australia (Secrecy and Dislosure (Sirta iyo Bixinta)) Xeerka 2015, sida Bulshada Red Cross ta Australia
- Dal dibeda ah ama urur caalami ah oo dadweyne.

Si kastaba ha ahaatee, waxa sii weheliya shuruudaha khaaska ah ee Qaybta 6 Xeerka Xoogga Xudduudaha, bixinta macluumaadka shakhsiyadeed sida waafaqsan Xeerka Xoogga Xudduudaha waxaa kaliya oo u idman mid ka mid ah hay'adaha kor ku qoran haddii ay sidoo kale ay tahay mid ama wax ka badan 'ujeedooyinka loo ogol yahay' ee ku taxan Xeerka Xoogga Xudduudaha. Tusaalayaal waxaa ka mid ah meesha bixintu ay tahay ujeedooyinkan soo socda midkood:

- maamulka ama dhaqangelinta sharciga dembiyada ama sharciga la xiriira ganacsiga
- caawinta baaritaanka sida qof dhintay, baaritaanka ama weydiimaha
- ilaalinta caafimaadka dadweynaha, ama nolosha ama ammaanka qof ama wax ka badan
- ururinta ama caddeynta tira koobka sida waafaqsan *Census and Statistics Act 1905 (Xeerka Tirada iyo Tirakoobka 1905)* ama *Australian Bureau of Statistics Act 1975 (Xeerka Golaha Tirada Australia 1975)*
- ilaalinta dakhliga dadweynaha
- aqoonsiga qof ama caddeynta dhalashadooda ama xaalada fiisahooda
- siinta adeegyo dadkaan ahayn muwaadiniin Australian ah
- maamulida Qorshaha ka hortaga ka ganacsiga daroogada qaranka
- ujeedo la xiriirta laanta socdaalka, karantiinka ama kontoroolka xudduuda u dhaxeysa Australia iyo dal bibeda ah
- arimaha ay daboolayaan shuruuc kala duwan oo ay ka midka yihiin Customs Act, Migration Act, Maritime Powers Act, Citizenship Act, IGOC Act, (Xeerka Kastamka, Xeerka Socdaalka, Xeerka Awoodaha Badda, Xeerka Muwaadinka, Xeerka IGOC, iwm)
- ujeedo la xiriirta difaaca ama nabadgelyada qaranka.

Wasaaradu waxay sidoo kale u idman tahay inay bixiso macluumaadka shakhsiyeed ee ilaashan haddii qofku uu raali ka haado in la bixiyo, bixintuna ay lagama maarmaan u tahay ka hortaga ama yareynta hanjabaad darran oo nafeed ama mid caafimaad oo shakhsi ama macluumaadka haddaba si sharci ah ayey dadweynuhu ku helayaan.

Qaybta 51 ee Xeerka Ciidamada Xudduudaha wuxuu bixiyaa in bixintu ay waafaqsan tahay waxyaalo ay ogolaaneyso Qaybta 6aad ee Xeerkaad oo loo qaadan doono mid bixinteeda uu u idmay Xeerka ujeedooyinak Xeerka Arimaha gaarka ah.

Waxaa taas sii weheliya, bixinta macluumaadka Ilaalinta Xadka iyo Socdaalka waa la ogol yahay sida waafaqsan Xeerka Ciidamada Xudduudaha haddii loo sameeyo intay socoto shaqada qof lagu kalsoon yahay ama adeeg wasaaradda loo sameynayo. Wasaaraddu waxay hubin doontaa in wixii bixin macluumaad ahi ay raacdo Xeerka Arimaha gaarka ah.

Wasaaradda waxaa sidoo kale loo idmay inay bixiso macluumaadka shakhsiyeed oo ah macluumaad la ilaaliyey xaaladu xaddidan sida la filayo sharciyada la xiriira kastamka sida shuruucda iyo Xeerarka Kastamka.

## Bixinta Diiwaanka Dhaqdhaqaaqa

Rikoodhada imaanshaha iyo bixitaanka ee dadka safarka ah ee Australiya soogeliya ama ka baxaya waxaa lagu keydiyaa keydka macluumaadka dhaqdhaqaaqa diiwaanka. Waxaa laga yaabaa in loo bixiyo ujeedooyinkan awgood:

- sharciga Socdaalka
- *Family Law Act 1975 (Sharciga Qoyska ee 1975)*
- sharciga ka saarida ama kastanka
- sharciyada caafimaadka ama karantiinka
- sharciga dhaqangelinta
- *Education Services for Overseas Students Act 2000 (Adeegyada waxbarashada ee Sharciga Ardeyda Dibeda 2000)*
- sharciga la sheegay ee dawlada dhexe, gobolka ama territory –ga, sida maamulka barnaamijka mulkiilayaasha guriga koowaad ama carruurta iyo/ama barnaamijyada samafalka.

## Siinta macluumaadka hay'adaha dhaqangelinta sharciga iyo arimaha la xiriira

Bixinta macluumaadka caadiga ah ee wasaaradda ee hay'adaha sharciga iyo ujeedooyinka la xiriira (oo ay ku jiraan waxqabadka dhaqangelinta hoos yimaada Xeerarka Muwaadinka iyo Laanta Socdaalka iyo waxqabadka dhaqangelinta hay'adaha kale ee dhaqangelinta) waxaa ka mid ah:

- Ha'yadaha dhaqangelinta sharciga ee dibeda iyo Australiya si ay u qiimeeyaan oo ay u dhaqangeliyaan waxa laga rabo shakhsi ahaan
- Ha'yadaha dhaqangelinta sharciga ee dibeda iyo Australiya ha'yadaha sirdoonka ama guddiyada, Adeegyada Boliiska ee Guud ee Qaranka, boliiska ka maxkamada caalamiga ah, Xarunta Bartilmaansiga Xadka Qaranka CrimTrac, AusTRAC, gudiyada sharciyada, guddiyada baarlamaanta ee weydiimaha, maxkamadaha caalamiga ah iyo ha'yadaha socdaalka ee dibeda, si loo garto ama loo baaro khiyaanada socdaalka, arimaha nabadgelyada qaranka, ama ku lugyeelashada laga shakisan yahay debiyo dagaal ama dembiyada ka soo horjeeda bani'aadanimada
- Guddiga Australia ee Daacadnimada Dhaqangelinta Sharciga si loo maamulo *Law Enforcement Integrity Commissioner Act 2006 (Xeerka Guddoomiyaha Daacadnimada Dhaqangelinta Sharciga 2006)*
- ATO, DHS iyo ha'yadaha kale ee territory-ga, gobolka ama dawlada dhexe si ay helaan meeshuu joogo qof shaqeynaya oo jebiyey shuruudahooda la xiriira visahooda
- AFP iyo xoogga boliiska Australiya inay helaan meeshay joogaan muwaadiniinta sharci darada ah
- Agaasimaha Xeer ilaaliyaha Guud ee dacwada ku soo oogaya dembiyada muwaadininimada ama socdaalka
- Dawladaha dibeda si loo saaro muwaadiniin sharci daro ah
- FWO, Ha'yadaha waxbarashada ee diiwaangashan, loo shaqeeyayaasha, dadka la wakaashey, dadka wax wakaashay, shaqo bixiyayaashu inay la socdaan raacitaanka shuruudaha visaha iyo waajibaadka wakaalashada iyo in la wargeliyo wakhtiyo lagu soo rogayo cunaqabateyn
- Wakaaladaha dhaqangelinta sharciga oo ay ku jiraan AFP waxa la xiriira macluumaadka khaaska ah ee codsadayaasha fiisaha iyo kuwa u dalba ee hoos yimaada barnaamijka Bani'aadanimo iyo Qaxootiga, si loo qarto dhaqangelinta sharciga ama arimaha nabadgelyada qaranka.

## Bixinta macluumaadka ee wasaaradda wakaalada dhaqangelinta sharciga

Wasaaraddu waa wakaalada dhaqangelinta sharciga ee ujeedooyinka qaarkood sida waafaqsan Xeerarka soo socda: the C*rimes Act 1914,* the *Criminal Code Act 1995,* the *Australian Nuclear Science and Technology Organisation Act 1987* (the ANSTO Act) and the *Independent National Security Legislation Monitor Act 2010 (Xeerka Dembiyada 1914, Xeerka Koodhka dembiyada 1995, Xeerka Ururka tignoolajiyada iyo Sayniska Nugliyeerka Australiya 1987* (Xeerka ANSTO) iyo *Xeerka La socodka Sharciga nabedgelyada Qaranka ee madaxa bannaan 2010)),* waxaana laga yaabaa in la bixiyo macluumaadka shakhsiyadeed si ay u qabtaan shaqadooda iyo waxqabadka xeerarkaas hoos imanaya.

## Waxyaalaha kale ee la bixinayo ee la xiriira maamulka barnaamijka

### Hubinta taageerada

Macluumaadka la xiriira dadka bixinaya hubinta taageerada waxaa loo sheegi doonaa Centrelink si loo fududeeyo fasaxida debaajigii la bixiyey ama aqoonsigii iyo la soo noqoshada deyntii la galay.

### Shaqada, shaqa bixinta iyo xirfadaha ganacsi

Wasaaradda waxaa laga yaabaa inay bixiso macluumaad ku saabsan xaalada socdaalka, xuquuqda shaqo iyo nooca iyo inta ay le'eeg taay visahaagu loo shaqeeyayaasha, shaqo bixiyayaasha iyo dhinacyo saddexaad oo ku isticmaala adeegaaga nidaamka bixinta shaqaalaha. Tusaale, markaad shaqo dalbato, wasaaraddu waxaa laga yaabaa inay siiso mulkiilaha ama shaqo bixiyaha wax ku saabsan xaq u yeelashadaada shaqo.

Wasaaraddu waxay sidoo kale siineysaa macluumaadka ha'yadaha iyo wasaaraddaha horumarinta dhaqaalaha ee gobolka iyo territoryga ee caawiya soogalootiga xirfada ganacsi inay isticmaalaan adeegyada macluumaadka ganacsiga dawlada.

### Tababarka iyo waxbarashada

Macluumaadka shakhsiyeed waxaa laga yaabaa in la siiyo:

- DFAT, Wasaaradda Wershadaha iyo Wasaaradda Waxbarashada si ay uga caawiso kuwa doonaya inay tababar qaataan ama inay wax ku bartaan Australiya
- Wasaaradda Shaqada inay go'aamiso wixii raad ay ku yeelaneyso qaybta goobta shaqada ee la soo jeediyey suuga shaqada ee Australiya
- Wasaaradda Waxbarashada iyo ha'yadaha shaqada loo dhiibay ee qiimeeya aqoonsiyada dibeda noocyo ka mid ah visooyinka
- Ha'yadaha waxbarashada ee bixiya waxbarida luuqada Ingiriiska ee waafaqsan Barnaamijka Ingiriiska ee Dadka waaweyn ee Soogalootiga ah
- Hay'adaha dawlada ee ujeedooyinka sharciga kuwa bixiya waxbarashada.

### Caafimaadka

Faahfaahintaada ama caafimaadka xubnahaaga qoyska sida lagu qiimeeyey codsiga visahaaga waxaa laga yaabaa in la siiyo ha'yadaha caafimaadka dawlada iyo kuwa caafimaadka si looga caawiyo go'aaminta haddii shuruuradaha caafimaadka la fuliyey si loo bixiyo fiisaha, tixgelinta in laga daayo shuruuda caafimaadka ama maareynta khataraha caafimaadka dadweynaha.

### Soo galootiga caawimaada bani'aadanimo iyo Qaxootiga, nabadgelyada dalka gudihiisa

Wasaaradda waxaa laga yaabaa inay isdhaafsadaan macluumaadka shakhsiyeed ee qaxootiga iyo soogalayaasha bani'aadanimo iyo kuwa wax u dalbayba (haddii ay khuseyso) adeeg bixiyayaasha la qandaraastay sida waafaqsan Adeegyada Dejinta Bani'aadanimo.

Wasaaraddu waxaa laga yaabaa inay siiso macluumaad shakhsiyeed oo khuseeya dadka magangelyada raadinaya iyo codsiilayaasha nabadgelyada ama visaha caawimaada bani'aadanimo Ha'yada Qaxootiga ee Qaramada Midoobay (UNHCR) iyadoo ujeedadu tahay xaqiijinta aqoonsiga iyo dalabyada nabadgelyada ama caawimaada bani'aadanimo.

Wasaaradda waxaa sidoo kale laga yaabaa inay siiso macluumaad shakhsiyeed Ururka Caalamiga ah ee Socdaalka si ay uga caawiso adeeg bixinteeda.

### Xabsiyid

Wasaaraddu waxaa laga yaabaa inay macluumaad ka shakhsiyeed ee khuseeya maxbuusiinta Socdaalka siiso:

- ha'yadaha samafalka ee terrirtory ga iyo gobolka ee la xiriirta maxbuusid ka duwan oo la habeeyey, daryeelka carruurta aan lala socon ee yar yar ama masuul ka noqoshada maxaabiiska qaba iimaha caafimaadka maskaxda iyo jirkaba leh
- adeegyada dhaqan toosinta ee territoryga iyo gobolka si loo fududeeyo wareejinta oo loo xaqiijiyo xaalada socdaal
- adeeg bixiyayaasha shaqo dib ku qabashada ee taageerida u wareejinaha
- dugsiyada, dhakhaatiirta caafimaadka iyo caafimaadka iyo adeeg bixiyayaasha samafalka, ama la taliyayaasha socdaalka ee adeegyada adiga ku siinaya ama qiimeynaya fursadahaaga ay kugu caawin karaan ama qoyskaagu inuu ku baxo.

### Samafalka iyo nabadgelyada carruurta

Macluumaadka shakhsiyeed ee carruurta, iyo/ama waalidiinta/masuuliyiinta/xannaaneeyayaasha carruurta, waxaa laga yaabaa in la siiyo ha'yadaha samafalka carruurta iyo nabadgelyada, gobolka/territory ga ee wakaaladaha samafalka carruurta, boliiska gobolka/territory ga ama wakaaladaha Dawlada Australia ee kale:

- habee oo la soco xannaanada iyo habeynta samafalka xabsiga socdaalka iyo/ama bulshada dhexdeeda
- baar waxyeelayn suurtogal ah ama dayacaad
- fududee nidaamka safarka iyo dukumiintiyada.

Macluumaadka la xiriira carruurta soo gelaya Australiya si loo korsado waxaa laga yaabaa in la siiyo ururada samafalka territory ga iyo gobolka, Hay'adaha Ilmo korsiga Dhexe ee Australia iyo Dalka dhexdiisa Ilmo ku korsiga Australia.

### Macluumaadka safaaradaha, guddiga sare iyo qunsuliyadaha si loo helo dukumiinti lagu safro

Haddii lagu siiyo visa adoo jooga meeshaad ka baxeysid ama aadan ku lahayn waxaad si sharci ah ugu joogto Australiya waxaa lagaa filayaa inaad baxdo. Haddii aadan heysay ama aadan kuhelin dukumiinti safar oo sax ah wakhti macquul ah gudihiis, waa siday wax u qabato wasaaraddu ee caadiga ah inay u dalbato mid iyadoo ku metelaysa. Tanina waxay ogolaaneysaa in bixitaankaaga la sameeyo.

Wasaaraddu waxay siin doontaa oo kaliya macluumaadka ugu yar ee ay u baahan tahay safaaradda ku haboon, guddiga sare ama qunsuliyada si loo fududeeyo bixinta dukumiinta safarka. Tan waxaa ka mid ahaan kara magacaaga, faahfaahinta baasaboorkaaga hadda ama dukumiintigii kale ee aqoonsi ah iyo faahfaahinta xiriirka.

### Muwaadanimada

Wasaaraddu waxaa laga yaabaa inay siiso macluumaad shakhsiyeed oo aan ka ahayn waxa qofka lagu qaranayo:

- golayaasha dawlada dhexe iyo ururada kale oo ujeedadeedu tahay qabashada iyo martigelinta xafladaha muwaadanimada
- Xafiiska Xoghaynta Rasmiga ah ee Guddoomiyaha Guud iyo Wasaaradda Raysul wasaaraha iyo Goluhu inay tixgeliyaan codsiyada sharafta Australiya
- Xubnaha baarlamaanta iyo wakiilada dawlada hoose oo ujeedadoodu tahay ku soo dhoweynta muwaadaniinta cusub bulshada Australiya.

### Daraasad cilmiyeedka socdaalka

Macluumaadka shakhsiyeed waxaa laga yaabaa in loo isticmaalo xograadinta macaamiisha hadda iyo kuwii horeba. Macluumaadka shakhsiyeed waxaa laga yaabaa in loo sheego ha'yadaha kale iyo dhinacyada kale ee la qandaraasay oo ujeedooyinkoodu yihiin cilmi barista, baaritaanka iyo taxliilinta qorshaha iyo/ama barnaamijka horumarinta. Heshiisyadu waxay ku xaddidaan isticmaalkooda ujeedooyinka cilmi barista, waxayna u baahan yihiim burburintooda marka la dhammeystiro. Macluumaadka la soo ururiyey oo loo isticmaalay cilmi barista waxaa laga saaraa waxa lagu garanayo ka hor intaan la siideyn.

Macluumaadka shakhsiyeed waxaa laga yaabaa in la siiyo Ha'yada Tira koobka Australiya si ay u fududeyso cilmi barista tirada dadka cusub ee yimaada iyo tafaasiisha natiijooyinka dejinta iyo barnaamijyada socdaalka ee kala duwan.

Macluumaadka la xiriira dadka dhowaan yimid waxaa laga yaabaa in la siiyo ha'yadaha territory ga iyo gobolka ama ururada adeegyada soo galootiga si uu uga caawiyo qoysheynta dejinta ama bixinta adeegyada dejinta.


© COMMONWEALTH OF AUSTRALIA, 2020

## Dhacdooyinka caalamiga ee ugu waaweyn

Macluumaadka shakhsiyeed waxaa laga yaabaa in la siiyo hay'adaha Dawlada Australiya, oo ay ku jiraan hay'ada territory ga iyo gobolka, ee leh doorar xiriirineed dhacdooyinka caalamiga ah ee waaweyn sida: ciyaaraha waaweyn iyo cayaaraha tartanka ah; kulamada madaxda caalamiga ah ee gobolada; bulshada, isu imaatanka aduunka ee diimaha ama dhaqamada ama feestooyinka.

Wasaaradda waxaa laga yaabaa inay sidoo kale isticmaasho oo ay bixiso macluumaadka aan xasaasiga ahayn ee Australiya iyo ururada caalamiga ah, iyo dalalka kale, si loo fududeeyo diyaargarowgaaga.

## Macluumaad ku saabsan qorshaha gaarka ah ee wasaaradda

Qorshaha gaarka ah ee wasaaradda waxaa laga helayaa website ka wasaaradda **https://www.homeaffairs.gov.au/access-and-accountability/our-commitments/privacy**

Qorshaha wuxuu ka kooban yahay macluumaad ku saabsan:

- sidii aad u isticmaali lahayd macluumaadkaaga shakhsiyeed ee ay heyso wasaaraddu iyo inaad raadsato sixitaankiisa
- side baad uga caban kartaa wax ku saabsan jebinta arinaha gaarka ah iyo nidaamka maareynta cabashooyinka wasaaradda.

## Siinta macluumaadkaaga dad debeda ah

Wasaaradda waxay isticmaashaa qandaraaslayaan IT oo debeda ah si ay u gudbiyaan oo ay u keydiyaan macluumaadka, oo ay ku jiraan bixiyayaasha adeegan oo jooga dibeda.

Xaaladaha qaarkood waxaan siinaa macluumaad shakhsiyeed dad kale oo dibeda jooga. Badanaa cida helaysaa waxay noqon kartaa dalkaad caaddi ahaan u degan tahay ama dalka aad ka soo baxday (ilaa aad ka dalbatay nabadgelyo dalalkaas mooyee oo aad sugeysid qiimeynta dalabyadaas in la dhammeeyo). Tan waxaa ka mid ahaan doona siinta macluumaadka diyaaradaha ama wakiilada safarka iyadoo la xiriirta ka shaqeynta rakaabka ee horumarsan iyo ka shaqeynta visaha electarooniga ah.

Wasaaraddu waxay sidoo kale macluumaadka isdhaafsadaan dalalka ama ururada caalamiga ah ee la leh heshiiska wadaagida macluumaadka Australiya oo ay ku jirto laakiinse kuma xaddidna, Mareynkanka, Ingiriiska, Canada iyo New Zealand. Macluumaadkan isdhaafsiga macluumaadkan waxaa laga yaabaa inuu ku lug yeesho wadaagida macluumaadka laysku garto (shakhsiga waxa lagu garanayo).

Haddii uu jirto macluumaad ay iskumid yihiin waxa shakhsi ahaan lagugu garto, wasaaraddu waxaa laga yaabaa inay siiso macluumaadkaaga dhabta ah, nuqulada safarka iyo dukumiintiyada kale ee aqoonsiga ama macluumaadka dukumiintigan, xaaladaada socdaal iyo taariikhda socdaalka (oo laga yaabo inay ka mid yihiin dembiyo iyo khiyaano socdaal oo kasta) iyo macluumaad taariikheed dembi oo kasta.

Ujeedada bixintan macluumaadku waa inay ka caawiso xaqiijinta aqoonsigaaga iyo ay go'aamiso haddii aad siisey hay'ado kale isla aqoonsigan iyo dalabyo la mid ah.

Haddii aad sameynaysid codsiga visaha nabadgelyo doonka ama mid caawimaada bani'aadanimo ee dibeda ah dalabyo ka hor jeeda dawlada dal gaar ah, wasaaraddu ma siin doonto macluumaadka shakhsiyeed dawladaas, inaad Australiya joogto mooyee iyo inaad adigu:

- aad codsatay ama ogolaatay inaad dalkaan ku noqoto mooyee, ama
- la helay inaadan ahayn qofka ay Australiya ka saaran tahay waajibaadka nabadgelyada.

| | |
|---|---|
| *Bogga Interneetka* | **www.homeaffairs.gov.au** |
| *Khadka weydiimaha Guud* | Wac **131 881** inta lagu jiro saacadaha shaqada ee Australiya si aad ula hadashid xiriiriyaha (waxaa la helayaa macluumaad duuban wixii saacadaha shaqada ka baxsan). Haddii aad Australiya dibeda ka joogto, fadlan la xiriir safaarada Australiya ee kuugu dhow. |

© COMMONWEALTH OF AUSTRALIA, 2020